## Isdiiwaangelinta Hore

# Liiska hubinta

Providence Medicare Advantage Plans

Kahor intaadan qaadan go'aanka isdiiwaangelinta, waxaa muhiim ah inaad si buuxda u fahamto faa'iidooyinkayaga iyo xeerarkayaga. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, waxaad wici kartaa oo aad la hadli kartaa wakiilka adeegga macaamiisha lambarka **503-574-8000** ama **1-800-603-2340 (TTY: 711)**, 8 subaxnimo ilaa 8 galabnimo 7 maalmood usbuucii, 1-da Oktoobar ilaa 31-ka Maarso, iyo 8 subaxnimo ilaa 8 galabnimo Isniin ilaa Jimce, 1-da Abriil ilaa 30-ka Sebteembar. Waxa la xiran yahay Maalinta Xusuusta, Maalinta Madax-bannaanida, iyo Maalinta Shaqaalaha.

## Fahamka Faa'iidooyinka

- Caddaynta Daboolista (Evidence of Coverage, EOC) waxay bixisaa liis dhamaystiran oo ah dhammaan caymiska iyo adeegyada. Waa muhiim inaad dib-u-eegto caymiska qorshaha, kharashyada, iyo faa'iidooyinka ka hor inta aadan isdiiwaangelin. Booqo **ProvidenceHealthAssurance.com/EOC** si aad u aragto nuqul ka mid ah EOC ama wac lambarka **503-574-8000** ama **1-800-603-2340 (TTY: 711)** si aad u codsato hal nuqul.
- Dib-u-eeg tusaha bixiyaha (ama ka codso dhakhtarkaaga) si aad u hubiso in dhakhaatiirta aad hadda booqato ay ku jiraan gudaha shabakada. Haddii aan liiska lagu qorin, waxay la macno tahay in ay suurtogal tahay inaad doorato dhakhtar cusub.
- Dib-u-eeg tusaha farmashiyaha si aad u hubiso in farmashiyaha aad u isticmaashid daawo kasta oo dhakhtarku qoray
  uu ku jiro gudaha shabakada. Haddii farmashiyaha aan liiska lagu qorin, waxaa suurtogal ah inaad u baahan doonto inaad doorato farmashiye cusub oo aad u isticmaasho daawadaada uu dhakhtarku qoro.
- Dib-u-eeg foormulariga si aad u hubiso in dawooyinkaagu ay daboolan yihiin.

## Fahamka Xeerarka Muhiimka ah

- Marka lagu daro lacag-bixinta qorshahaaga bil kasta (ay ku jiraan $0 qorshayaasha lacag-bixinta), waa inaad sii wadato bixinta lacag-bixintaada Qaybta B ee Medicare. Lacag-bixintan waxa caadi ahaan laga jaraa jeeggaaga sooshal sekuuritiga bil kasta. Lacag bixinta Qaybta B waxa lagu daboolaa dadka ka isdiiwaangashan labada qorshe ee u qalma Providence Medicare Dual Plus (HMO D-SNP). Qorshayaasha Providence Medicare Pine + Rx (HMO) iyo Providence Medicare Sycamore + Rx (HMO) waxaa ka mid ah dhimista Lacag-bixinta Qaybta B. Dhimista Lacag-bixinta Qaybta B ee Medicare, oo sidoo kale loo yaqaan dhimista lacag-bixinta Qaybta B, waxay hoos u dhigi doontaa lacag-bixintaada billaha ah ee Qaybta B $24 ee qorshaha Pine iyo $10 ee qorshaha Sycamore. Providence Medicare Advantage Plans waxa ay si toos ah u bixin doontaa Maamulka Sooshal Sekuuritiga (Social Security Administration, SSA). Haddii aad ku bixiso lacag-bixintaada caafimaadka Qaybta B iyada oo loo marayo faa'iidadaada Sooshal Sekuuritiga, jeeggaaga bille ah ee Sooshal Sekuuritiga wuxuu kordhin doonaa $24 ee qorshaha Pine iyo $10 ee qorshaha Sycamore. Haddii aad si toos ah ugu bixiso lacag-bixintaada Qaybta B ee Medicare, lacag-bixintaada bille ah waxaa la dhimi doonaa $24 ee qorshaha Pine iyo $10 ee qorshaha Sycamore.
- Faa'iidooyinka, lacag-bixinnada, iyo/ama lacagaha qaybta ah/caymiska wadajirka ah waxay iseddeli karaan taariikhda 1-da Janaayo, 2027.
- Markaad dooranayso badeecad ka mid ah HMO, xasuusnow marka laga reebo xaaladaha degdegga ah ama xaaladaha daran, ma daboolno adeegyada bixiyayaasha shabakadaha ka baxsan (dhakhaatiirta aan ku jirin liiska tusaha bixiyaha).

- Qorshayaashayada HMO-POS waxay kuu oggolaanayaan inaad aragto bixiyeyaasha ka baxsan shabakadeena (bixiyeyaasha aan heshiiska nala lahayn). Si kastaba ha ahaatee, inta aan bixin doono adeegyada la daboolay qaarkood, bixiyaha waa inuu oggolaadaa inuu ku daweeyo. Marka laga reebo xaalad degdeg ah ama xaalad daran, bixiyeyaasha aan heshiiska nala lahayn ayaa laga yaabaa inay diidi karaan daryeelka. Intaa waxaa dheer, waxaad bixin doontaa qaybsi ka badan oo ah adeegyada ay helaan bixiyeyaasha aan heshiiska nala lahayn.
- Providence Medicare Dual Plus (HMO D-SNP) waa qorshe laba-qalan oo baahiyaha gaarka ah (dual eligible special needs plan, D-SNP). Awooddaada isdiiwaangelinta waxay ku salaysnaan doontaa xaqiijinta inaad xaq u leedahay Medicare iyo kaalmada caafimaad labadaba oo aad ka hesho qorshe goboleed ee hoos yimaada Medicaid.
- Saamaynta caymiska hadda jira. Haddii aad hadda ku diiwaangashan tahay qorshe Medicare Advantage, caymiskaaga daryeelka caafimaad ee Medicare Advantage hadda jira wuxuu dhammaan doonaa marka caymiskaaga cusub ee Medicare Advantage uu bilaabmo. Haddii aad leedahay Tricare, caymiskaaga ayaa laga yaabaa inuu saameeyo marka caymiskaaga cusub ee Medicare Advantage uu bilaabmo. Fadlan kala xiriir Tricare si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. Haddii aad leedahay qorshe Medigap, marka uu bilaabmo caymiskaaga Medicare Advantage, waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad joojiso siyaasaddaada Medigap maadaama aad bixinayso caymis aadan adeegsan karin.